

Nofeembar 12, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee BPS,

Waxaan sameynay horumar badan tan iyo qoraalkeygii ugu dambeeyay waxaana hayaa warbixino kooban oo aan idin la wadaago.

Ugu horeyn, waxaan dhameystireynaa qorshaha aan ardayda ugu celineyno afarta iskuul ee maalinta waxbarashada gaarka ah ee aan soo sheegay usbuucii la soo dhaafay: Carter, McKinley, Dugsiga Horace Mann ee Dhagoolayaasha iyo Maqal Adaga, iyo Henderson. Ardayda la aqoonsaday ee leh baahida ugu sareysa waxay si shaqsi ahaan wax uga baran doonaan dugsiyadaas Isniinta, Nofeembar 16. Waxaan la shaqeynay Hoggaamiyayaasha Dugsiyada, macallimiinta, iyo iskaashatadeena caafimaadka bulshada si loo dhameystiro qorshayaasha. Waxaan helnay [oggolaanshaha Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston](#) (BPHC) in dib loo furo dhismayaasha dugsiya.

Marka xigta, sidaad u aragtay, Badhasaabka Baker, Xoghayaha Peyser, iyo Commissioner Riley waxay sii daayeen tilmaamo cusub galabnimadii Jimcaha oo tilmaamaysa habka cusub ee gobolka ee xisaabinta iyo ka warbixinta xogta caafimaadka bulshada. Waxay sidoo kale ku xujeeyen degmoyinka dugsiyada inay ku soo celiyaan ardayda barashada shaqsi ahaan sida ugu dhaqsaha badan. BPHC waxay si dhow u eegaysaa habka cusub ee gobolka ee lagu cabbirayo heerarka infekshinka iyo saameynta ay ku leeyihiin awoodda iskuulku ku soo dhaweynayo ardayda iyo shaqaalaha dhismaha. Weli waxaa noo dhiman shaqo si aan si buuxda u fahamno xisaabintooda cusub waxaanan bixin doonaa warbixin dheeri ah usbuuca soo socda.

Waqti xaadirka, waxaan sii wadaynaa inaan la kulanno Hogaamiyaasha Dugsiyada iyo degmada iyo hogaanka ururka si aan ugala hadalno sida ugu wanaagsan ee loogu laaban karo waxbarashada shaqsi ahaaneed. In badan oo idinka mid ah ayaan ka maqalnay in iyadoo barashada durugsan ay si weyn u soo hagaagtay, in badan oo ka mid ah shaqsiyaadka shaqsiyan wax u barataa waa habka ugu fiican. Waxaa naga go'an inaan dib u furno dhismayaasha iskuulka sida ugu dhaqsiyaha badan ee aan awoodno, annagoo kaashanayna Magaalada iyo iskaashatadeena. Waxaan bilownay Hawl Xoog leh— oo ay kujiraan Hogaamiyaha Dugsiga, BTU, waalidka, ardayga, iyo wakiilada degmada—taasi waxay kaala talineysaa qorshayaasha dib loogu furayo iskuulada. Waxaan xiriir dhow la leenahay BPHC inta aan sii wadno ka shaqeynta si loo hubiyo in u diyaar ahaanshaheena caafimaad iyo badbaado la wada ciyaaro dhamaan sayniska soo koraya iyo hagista la cusbooneysiisay.

Waxaan rajeynayaa inaan bixiyo wixii ku soo kordha mustaqbalka.

Si midnimo ah,

Brenda Cassellius

Dr. Brenda Cassellius
Kormeeraha guud

